FSAU
Qaybta Falanqaynta Hubinta Cuntada ee Somalia

Waxa la soo saaray
December 14, 2005

Hubinta Cuntada & Nafaqada

Warbixinta Kooban ee December 2005

Tilmaamaha

Cimilada

Suuqyada

Nafaqada

Beeraha

Xoolaha

Arrimaha Gobolka ee Soo aacbaxaya

Cinwaanka:
FSAU - Somalia
Kalson Towers,
Parklands
Box 1230 Village Market
Nairobi, Kenya
Tilifoonka:
+254 20 374 5734
Faakiska:
+254 20 374 5098
Email:
fsauinfo@fsau.or.ke
www.fsausomali.org

Xaaladda Hubinta Cuntada oo si degdeg ah uga sii daraysa Koonfurta Soomaaliya
Roobabkii Deyrta oo aan lagu guulaysan, labadii xilli ee isku xigay oo ay roobabku ka hooseeyeen caadi waxay keeneen in Hubinta Cuntadu ay si degdeg ah isla markaana warwar leh u sii xumaanayso Koofurta Soomaaliya. Xoola-dhaqatada Gedo iyo qaybo ka mid ah woqooyiga Jubba ayey soo food saartay xaalad la xidhiidha hubinta cuntada waxana ay halis ugu jiraan **Xiisad Cuntada iyo Hab-nololeedka ah oo Aad u Xun**. Dadweynaha Gedo iyo Jubba horeba waxay ugu jireen xaalad sii socotay oo ah **Gurmad Bina-aadamnimo.** Saamaynta xaaladda hubinta cuntada ee sii xumaanaysaa waxay ku caddahay heerarka nafaqo-darrada ee sii kordhaysa. Dadweynahaas oo heerarka nafaqa-darradu horeba ay si weyn uga sarraysay heerarka la aqbali karo ee adduunka. Gobollo kale oo koonfurta ah ayey iyagana haystaan dhibaatooyin ah sida daaq xumi, biyaha oo kooban iyo dalagga go'ay oo liitay arrimahaas oo ay u sababtahay labadii xilli ee isku xigay oo roobabku ay aad caadi uga hooseeyeen iyo xaaladda hubinta-cuntada oo sii xumaan doonta xilliga jiilaalka.

Isku-darka soosaarka dalagga ee sannadka ayaa la filayaa inuu noqdo kii ugu hooseeyay muddo toban sano ah, taasoo keenaysa hoos u dhac guud oo dalagga ah (eeg warbixinta November 2005 ee FSAU). Fursad-uhelidda cuntada ayaa si weyn u sii xumaan doonta marka la eego qiimaha dalagga oo la filayo inuu kordho, iyadoo fursadaha dakhligu koobnaan doonaan, iswaydaarsiga ganacsiguna uu sii xumaan doono afarta bilood ee soo socda .

Dhacdada ugu xumi waxay noqon kartaa, soosaarka dalagga iyo xaaladda seeraha oo liita marka lagu daro inay dhici karto nabad la'aan sii kordha taasoo keeni doontaa in qayb weyn oo ah **koonfurta Soomaaliya ay si degdeg ah u sii xumaanayso oo ay noqonayso Gurmad bina-aadamnimo oo wayn**. Xitaa haddaanay nabad la'aantu kordhin, hubinta cuntada ee badi dadwaynuhu hoos ayey u sii dhici doontaa jiilaalka soo socda, iyadoo rajada laga qabo horumar in laga gaadhayo roobabka Gugu ay koobantahay.

Sida ay u Taabanayso Waxqabadka:
- In la sameeyo tallaabooyin waxqabad ah oo degdeg ah oo lagu taageerayo xoola-dhaqatada halista weyn ugu jira **xaalad ah Xiisad Hubinta Cuntada iyo Hab-nololeedka ah oo aad u Xun gobollada Gedo iyo Jubba (Eeg khariidadda 3-aad).**
- In la kordhiyo kaalmo bani-aadamnimo si looga taageero baahida aasaasiga ah ee dadwaynaha gobollada Gedo iyo Jubba ee ku jira xaalad **Gurmad Bina-aadamnimo (Eeg Khariidadda 3-aad).**
- **In la kordhiyo howlaha dadaalka ah nabadda iyo dib-u-heshiisiinta** si looga hortago dagaallo sii fida taasoo ciilad u keeni doonta **Gurmadka Bani-aadmnimo oo wayn** ee Koonfurta Soomaaliya.
- In **Qorshe Gurmad bina-aadmnimo oo wayn laga sameeyo dhamaan** koonfurta Soomaaliya.
- **In hannaanka jawaabcelinta kaalmada deeqbixiyuhu ay noqoto mid ay wax ku qaybsanayaan qiimaynata ay sameeyanayaan FSAU iyo kuwa gacansaarka la leh**. (Natiijada waxaa la soo saari doonaa toddobaadka labaad ee Jannaayo 2006)

Dib-u-soo kabashada Hab-nololeedka ee Gobollo Waqooyiga ah waxa Wiiqay Roobabka oo Liitay goobaha qaar.
Inkastoo guudahaan roobabka Deyrtu ay sii fican uga da'een Woqooyiga, waxaa jiray goobo ay biyuhu aad uga yaraadeen (Siiba Bariga Sanaag, Woqooyiga Bari iyo Togdheer qaarkeed). Burburkii hab-nololeedka ee dhacay abaartii hore ayaa xadiddaya fursadaha ay abaaraha kaga adkaystaan xoolo-dhaqatadu (sida Awrta rarada la'aantood iyo dhaqaale-xumo ay keeneen deynka aan wali la bixin iyo awoodda taageerada bulshada oo xadiddan). Sidaas darteed waxa baahi degdeg ah loo qabaa in lagu wado in la taageero dib-u-soo kabashada hab-nololeedka guudahaan dhammaan Waqooyiga, iyo in gaar ahaan la taageero goobaha ay biyola'aantu ka jirto.

Nabad la'aan
Xaaladda hubinta cuntada ee sii xumaanaysa dhammaan koonfurta Soomaaliya ayaa laga yaabaa in ay keento colaad sii kordha oo ku saabsan fursad ay xaq u helidda saadka kooban asida daaqqa iyo biyaha. colaaddu markay sidan u dhacdo waxay noqon karta sababta keenta iyo ta ay ka timmaaddoo hubin la'aantu cuntadu labadaba. Halista ka iminaysa in colladda ku salaysan saadku ay sii korodhaa waxay sii badan doontaa toddobaadyada soo socda maddaama saabdku uu noqon doono gabaabsi xilliga jiilaalka ee adag. Inakastoo ay jireen guudahaan horumar lagu sameeyey nabad sugidda degmooyinka qaar, haddana xaaladda nabad sugiddu way sii xumaatahay demooyin kale. Shilalka la xidhiidha nabadsugidda iyo xiisadda sii kordhaysaa waxay xaddidayaan gaadhidda bushada bina-aadamnimada ee goobahaas waxana ay sii labanlaabi doontaa dhibaatooyinka bina-aadamnimada ee horeba u jiray.



Xiliyada iyo Dhacdooyinka Muhiimka ah ee Soomaaliya

Cimilada

Roobabkii Deyrta laguma guulaysan badi koonfurta iyo bartamaha Soomaaliya. Roobabku wuay kasoo raageen badi gobollada beeralayda ee koonfurta. Aad ayay caadi uga hooseeyeen si siman iyo wakhti isku mid ahna dhulka ugamay di'in.

Sida uu muujinayo sawirka Saatalaytku, warbixinaha guduhuna ay xaqiijinayaan marka laga reebo qaybo ka mid ah Jubbooyinka, dhammaan gobollada beeralayda ee Koonfurta iyo qaybo ka mid ah Badhtamaha Soomaaliya isku darka roobka Deyrta ee ay heleen wuu ka yarayahay 100mm (Khariidadda 1-aad). Haddii la is barbar dhigo roobabka da'ay iyo kuwa caadi ahaan da' xilligan sanadka waxa muuqata in roobabka iillaa hadda da'ay ay ka yaryihiin 40% roobka caadiga ah. (Khariidadda 2-aad).

Khariidadda 1: Iskudarka roobka (mm) October - November 2005

Khariidadda 2: Isbeddelka % roobka caadiga ah October-November 2005



Source: FEWS NET/USGS

Jubbooyinka Saddex maalmood oo ay ka da'een roobab culus oo ku kooban dhulka miyiga ee hareeraha degmooyinka Xagar, Af-madow iyo Badhaadhe (gobolka Jubbada Hoose) waxay dib u buuxiyeen biyo galeemmada waxana ay dhimeen dhibaatooyinka xagga biyaha ee haystay bulshooyinka xoola-dhaqatada, laakiin wax weyn kamay tarin koritaanka daaqa.

Guud ahaan dhulka xoolo-dhaqatada ee gobollada Woqooyiga ee Sool, qaybo ka mid ah Sanaag, Togdheer iyo Nugaal waxa ku da'ay roobab wanaagsan oo hore u mariyey saadka biyaha iyo daaqa. Hase yeeshee goobo ka mid ah bariga Sanaag, qaybo ka mid ah Togdheer iyo qaar ka mid ah Bari waxay heleen roobab caadi ka hooseeya.

Nafaqada

Woqooyiga Gedo, natiijada ka imanysa hubinta cuntada ee sii xumaanaysa horeba waxa ay ku caddahay heerarka nafaqa-darrada ee ku sii kordhaya dadweynaha ku dhaqan Beled-Xaawo iyo hareeraheeda. Xog ururinta baraha la socodka nafaqada iyo xogta xarumaha caafimaadka oo la xoojiyey waxay muujinayaan inay korodhay tirada carruurta ay nafaqa-darradu haysaa. Waxa la diiwaangeliyey inay si weyn u korodhay tirada carruurta ay nafaqa-darro aad u xumi hayso ee la dhigay xarunta nafaqaynta iyo quudinta ee Beled Xaawo (Eeg tusmada 1-aad) iyo Mandera (Kiiniya)

.

Khariidadda 1: Baaxaadegga dadka la keeno bishii Xarunta Quudinta iyo Nafaqaynta ee Balad-xaawo (Gedo)



Xaaladda nafaqada ee dadweynaha Jubbooyinka ayaa wali si aad ah u liita inkasta oo helitaanka cuntada ay hore u mariyeen soo saarka xilliga caadiga ah ka baxsan iyo dhowaan gargaar cuntada ay oo la geeyey gobolladaas. Qiimayn nafaqada ah oo laga samaynayo dhulka webiyada iyo dadweynaha xooliyo-beero-dhaqatada ayaa socota.

Hab la socodka nafaqada oo la xoojiyey ayaa hadda ku jira howsha kormeeridda xaaladda soo shaacbaxaysa ee Bay, Bakool, Gedo, Galgaduud iyo koonfurta Mudug. Qaybta waqooyiga ee Soomaaliya waxay u muuqata in tartiib ay feyada dadku u soo kabanayso marka laga reebo qoysaska xaalufay iyo dadweynaha barakacay ama/dib u soo laabtay oo aan weli la qabsan dadweynaha intooda kale. Qiimeyn Degdeg ah oo la sameeyey waxa lagu diiwaangashay heerka nafaqa-darrada ee guud inuu yahay 15% dadka barakacay ee jooga Burco (October 2005). Dadka barakacay ee jooga Boosaaso carruurta ay nafqadarradu hayso ee la diiwaan gashay tiradoodu wali way saraysaa. Warbixinno buuxa iyo faahfaahin waxa laga helayaa FSAU.

Beeraha (Woqooyi Galbeed)

Isagoo ka duwan soosaarka dalagga Dayrta iyo Guga 2005 ee koonfurta Soomaaliya, bishii la soo dhaafay dalagga Guga/Karanta 2005 ee ka go'ay gobbollada Waqooyi Galbeed aad ayuu u fiicanaa. Roobabkii Guga 2005 ee Goboolada Woqooyi Galbeed way ka sarreeyeen caadi, taasoo keentay in bishii la soo dhaafay ee (November) dalagga u go'ay uu badnaa. Waxa kale oo uu hore u mariyey daaqa iyo biyaha. Illaa 27,000 Mt oo dalag ah (82% hadhuudh ah iyo 18% galley ah) ayaa u go'ay gobollada Waqooyi Galbeed. Tiradan soosaarkuu waa tii la baad ee ugu sarraysay toddobadii sano ee la soo dhaafay. Waxana weeye 150% ee soosaarka dagaalka kadib ee degmooyinkaas. Tan waxa u sabab ah dhowr arrimood oo ay ka mid yihiin roobabka oo wakhtigoodii ku da'ay, si simmanna u da'ay iyo kaalmo weyn oo beeralayda yaryari ay ka heleen Sanduuqa Caalamiga ah ee Horumarinta Beeraha (IFAD).

Woqooyi galbeed wuxuu uga duwan yahay koonfurta hannaanka dalagga, waxaa jira hal xilli oo si weyn dalaggu ugu boxo woqooyiga (Gu'/Karan) oo ah May-October. Inkastoo wax soosaarka dalagga Woqooyi galbeed, uu muhiim yahay, haddana waxay abuuraan 5-10% oo ka mid ah wax soo saar sanadeedka dalagga waddanka.

Wax soo saarkii Guga oo caadiga ka sareeyey iyo guud ahaan roobabkii ka da'ay gobollada Woqooyi-Galbeed oo fiicnaa waxay hore u mariyeen xaaladda hubinta cuntada ee gobolladaas. Hilitaanka cuntada aasaasiga ah ee suuqyada ee sii kordhay iyo qiimaha xoolaha iyo cowska ee sarreeyaa waxay hore u marin doonaan iswaydaarsiga ganacsiga beero-xoolo-dhaqatada Soomaalilaand. Dallaga mooyaane, beeralaydu waxa kale oo ay beeraan waxyaabaha dhakhso lacagta looga helo (sida qaraha ama xab-xabka, tamaandhada ama yaanyada, digirta yar yar iyo basasha), Dhammaan arrimahaasi waxa la filayaa inay si weyn wax uga taraan ilaha cuntada iyo dakhliga ee qoyska.

Xoolaha

Xaaladda hubinta cuntada ee xoolo-dhaqatada Gedo iyo qaybo ka tirsan Jubbooyinka waxay ku waddaa inay sii xumaanayso. Degmooyinka sida xun ay u samaysay ee gobolladani waxay halis weyn ugu jiraan **Xiisad Cuntada iyo Hab-nololeedka ah oo Aad u Xun.** Biyaha iyo daaqu si weyn ayay ugu yaryihiin dhulka daaqa ee badi gobolka Gedo iyo qaybo ka mid ah Jubbada Dhexe (Salagle). Xaaladda xoolaha gaarahaan Lo'du waxay u sii xumaanaysaa heer warwar leh. Xoolo-dhaqataduna waxay u sii hayaamayaan dhinaca webiyada roobka oo aan lagu guulaysan dartiis taasina waxay keentay shilal sii kordhaya oo dhexmaraya beeralayda iyo xoola-dhaqatada waxana ay keeni kartaa colaad ku salaysan saadka. Shilal ama dhacdooyin dhowr ah ayaa horeba la soo sheegay inay ka dhaceen koonfurta Gedo. Soosaarka xoolaha iyo qiimahooduba si weyn ayay hoos ugu dhaceen. Marka la is barbar-dhigo bishan January ee sannadkan iyo tii sannadkii hore, qiimaha Lo'da Baardheere wuxuu hoos u dhacay 66% iyadoo sannadkii hore qiimuhu uu hoos u dhacay 34%. Iswaydaarsiga ganacsiga ee ka dhexeeya dalagga iyo xooluhu tiro tan aan kor ku sheegnay u dhiganta ayuu hoos u dhacay.

Dhowr maalmood oo roobab xoog lihi ay ka da'een degmooyinka Af-madow, Xagar, iyo Badhaadhe (Jubbada Hoose) ayaa hore u mariyey fursad-u-helidda biyaha ee dhulka miyiga ah, waxana ay keeneen in xooluhu ay ka guuraan dhulka webiyada. Hase yeeshee xoolaha oo aad ugu ururay degmooyinkaa dartood saadka biyaha iyo daaqa ee jiraa waxa laga yaabaa inaanu in badan jirin. Xaaladduna way ka sii dari doontaa jiilaalka dheer ee soo socda.

Shabeellooyinka xaaladda xooluhu badi waa caadi, laakiin gobollada Bay, Bakool iyo Hiiraan xoolo-dhaqatada dhibaato ayaa haysata. Gobollada Dhexe, degmada Hobyo colaad qabiil oo la soo cusboonaysiiyey ayaa halis weyn ku haysaa hab-nololeedka bulshada xoolo-dhaqatada, gaarahaan kuwa horeba ay u saamaysay xiisad cuntada iyo hab-nololeedka ah oo aad u xun.

Gobollada Woqooyiga, xaaladda xooluhu guudahaan hore ayay u maraysaa. Saadka biyaha iyo daaqa soo cusboonaaday wuxuu hore u mariyey soosaarka xoolaha badi degmooyinkaas. Heerka dhalmada geelu wuu sarreeyaa, kaasoo keenay in ay korodhay helitaanka caanaha iyo subaggu. Hase yeeshee qaybo ka mid ah bariga Sanaag, gobollada Togdheer iyo Bari waxa la soo gudboonaatay in roobka si weyn loogu guuldaraysatay taasoo ay weheliso in ceelashu ay shaqayn waayeen degmooyinka Xingalool, Carmala, Ceel-buux iyo Baraagahaqol taasoo keentay in biyuhu ay si xun u yaraadeen. Qiimaha biyuhu si weyn ayay u sii kordhayaan. Awrta rarada ee la haysto oo koobani waxay xadidday xeeladaha loogu adkaysto hayaanka ama guuritaanka waxana ay keenaysa in qiimaha gaadiidku uu sarreeyo.

Guud ahaan xaaladda xoolaha oo wanaagsan oo ay weheliso baahida xilliga xajka loo qabo adhigu waxay keentay in dhoofinta xooluhu ay korodhay marka loo eego wakhtigan sannadkii hore. Adhi wadartoodu ay tahay 260,318 ayaa laga dhoofiye dekedaha Berbera iyo Boosaaso tirada oo ka yar 75,678 oo neef tiradii la dhoofiyey bishii la soo dhaafay (kaddib xilliga xajka ee suuqu uu halka ugu sarraysa gaadho). Wadartkan 140.318 neef ayaa laga dhoofiyey Boosaaso, 119,982 neefna waxa laga dhoofiyey Berbera.

Khariidadda 3: Qoondaynta Xaaladda Hubinta Cuntada oo ay arrimmo badani ku jiraan



FSAU iyo hay'adaha ay isbahaystaan waxay hadda wadaan Qiimayn la ballaadhiyey oo Deyrta Kadibah oo ku saabsan Xoola-Dhaaqatada iyo Abuuritaanka Dalagga oo laga samaynayo dhammaan gobollada koonfurta iyo kuwa Dhexe, iyo waliba qiimayn lagu samaynayo Xoola-dhaqatada waqooyiga.

Waxaa hoos ku qoran dhacdooyinka iyo waxtigooda:

11 December 2005	-Kulamada Qorshaynta Qiimaynta ee heer Gobol oo lagu qabtay Marka, Bu'aale, Baladweyne, Xuddur, Garoowe iyo Hargeysa
14 - 27 December 2005	-Howsha Gudaha oo laga samaynayo Shabeellooyinka, Jubbooyinka, gobolladda Dhexe, gobollada Waqooyi Galbeed iyo gobollada Waqooyi Bari
17 - 19 December 2005	-Tababarka Nafaqeeyayaasha Yaryar oo FSAU ay ku qaban doonto Hargeysa
31 December 2005	-Kulmada Falanqaynta ee heer Gobol oo lagu qaban doono Marka, Buale, Baladweyne, Xudur, Garoowe iyo Hargeysa.
4 - 8 January 2006	-Aqoon-iswaydaarisiga Falaqaynta ee Dhammaan Kooxda Qiimaynta oo lagu qaban doono Hargeysa
16 January 2006	-Natiijooyinka hordhaca ah oo lala wadaagayo Shir Gaar ah oo lagu qabanayo SACB FSRD
31 January 2006	-TaxanahaFarsama ee FSAU warbixinta Falanqaynta deyrta Kadib oo la soo saari doono

Technical & Managerial Support

Funding Agencies

Technical Partners